IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

Sannadka 12aad Muqdisho 1da Agoosto 1984 L.8

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU**: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. kalkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 26 ee 5 Luulyo 1984 Sarciga Shaqaalaha Warshadaha Qaranka.— BOG. 566

SHARCI L. 27 ee 7 Luulyo 1984 Oggolaansho Heshiis amaaheed oo dhex maray J.D.S. iyo Bankiga maalgelinta ee Yurub, kuna saabsan Mashruuca Gaaska Afgooye.— » 569

SHARCI L. 28 ee 7 Luulyo 1984 Oggolaansho Heshiis amaaheed oo dhexmaray J.D.S. iyo Hay'adda Horumarinta Caalamiga (IDA) oo ku saabsan Mashruuca Gaaska Afgooye.— » 570

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

# QAYBTA LABAAD

## XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 26 ee 15 Maajo 1984 meelmarin Heshiis » 571

DECREE MADAXWEYNAHA J.D.S. No. 26 on 15 May 1984 Instrument of Ratification » 572

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L, 27 ee 7 Luulyo 1984 meelmarin Heshiis dhex maray J.D.S. iyo Bankiga Maalgelinta ee Yurub, kuna saabsan amaah lacag-eed oo loogu tala galay Mashruuca Gaaska Afgooye. » 573

DECREE No. 27 on 7 July 1984 Instrument of Ratifica tion.— » 574

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 28 ee 7 Luulyo 1984 meelmarin Heshiis amaa heed oo dhexmaray J.D.S. iyo Hay'ad da Caalamiga (IDA) oo ku saabsan Ma shruuca Gaaska Afgooye » 575

DECREE No. 28 on 7 July 1984 Instrument of Ratification.— » 576

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 29 ee 17 Juunyo 1984 Magacaabid ku sime Xeer Ilaaliye Guud. » 577

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 30 ee 13 Juunyo 1984 Magacaabid Garsoore (La—Taliye MBD. » 578

XEER WASAARADDA GAASHAANDHIG-GA L. 3 ee 4 Jun. 1984 Magacaabid Kaaliye.— » 579

## QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH—


DAWLADDA HOOSE EE Muqdisho, 5.2.83, Naado Dhul Jaalle Cusmaan Sheekh Maxamed L. 243 » 580

DAWLADDA HOOSE EE Muqdisho, 5.2.83, Naado Dhul Jaalle Saciid Maxamed Maxamuud L. 244 » 581

DAWLADDA HOOSE EE Muqdisho, 5.2.83, Naado Dhul Jaalle Cusmaan Maxamed Heerow L. 245 » 582

DAWLADDA HOOSE EE Muqdisho, 5.2.83, Naado Dhul Jaalle Maxamed Sheekh Xasan L.246 » 583

DAWLADDA HOOSE EE Muqdisho, 5.2.83, Naado Dhul Jaalle Saciid Maxamed Maxamuud L. 247 » 584

DAWLADDA HOOSE EE Muqdisho, 31.1.83 Naado Dhul Jaalle Maxamuud Axmed Shirwac L. 248 » 585

DAWLADDA H. MUQDISHO, 16.1.83, Nado Bed. Naado Dhul Jaalle Faaduma Cabdullaahi Cali L. 249 » 586

MAXKAMADDA GOBOLKA SH. HOOSE 27.6.84, Lumid Buug Keyd L. 1236,7 ku qoran Faaduma Jumcaale Cumar L. 250 » 587

MAXKAMADDA GOBOLKA BANNADIR, » 588
22.7.84, Lumid Jeeg War. L. 236688 ku
qoran Maxamed Abuukar Sh. L. 251 » 590

MAXKAMADDA GOBOLKA BANNADIR, » 589
qoran Cabdulaahi Cumar Jaamac L. 252

## QAYBTA KOWAAD

### S H A R C I

Sharci Lambar 26 taariikh 5 Luulyo 1984 Sharciga Shaqaalaha Warshadda Qaranka.—

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA: Sharciga Soo Socda.

Qod. 1aad

1. Sharcigu wuxuu saameeyaa Warsharaha Qaranka oo idil, ha ahaado kuwa qaabka leh iyo kuwa aan lahayn, kuwa hirgalay ama kuwa weli heer Mashruuc ah iyo kuwa kale ee mustaqbilka dhismi doona.

2. Shaqaalaha Warshadaha Qaranka waxaa loola Jeedaa Shaqaalaha Joogtada ah iyo kuwa aan Joogtada ahayn ee ka shaqeeya Warshadaha, maalinta sharci gani dhaqan galo iyo kuwa dib laga qori doono, marka laga reebo Maareeyaha Guud iyo ku xigeenka Maareeyaha Guud, haddii uu jiro oo lagu magacaabo Xeer Madaxweyne.—

Qod. 2aad

Shaqaalaha Warshadaha waxaa lagu dhaqi doonaa, laga biiaabo 1da Sitembar 1984, sharciga tirsigiisu yahay 65 ee soo baxay 18kii Oktoobar 1972kii, iyo beddelaadyadii ka dambeeyay.

Qod. 3aad

1. Warshad kasta waxay sameysaneysaa heshiis wada jireed oo soconaaya muddo 3 sano ah, wuxuuna dhex marayaa Maamulka Warshadda iyo Wakiilada Shaqaalaha, iyadoo la raacayo qodobada 31 iyo 32 ee Sharciga Shaqaalaha oo ku xusan qodobka hore.

2. Heshiisku wuxuu tixgelinayaa awoodda dhaqaale, Farsamo, wax soo saar iyo degaan ee War/d kasta.

3. Maamulka Warshaduhu waxay ku dhameynayaan abaabulka iyo saxiixa heshiisyada ku tilmaaman faqradda 1aad ee qodobkan ilaa 31ka Agoosto 1984.

Qod. 4aad

1. Warshdaha Qaranka waxaa laga baabi'iyay qaabkii iyo meeleyntii Shaqaalaha Joogtada ah ee horay loogu sameeyay.

2. Xuxuuqda hawl-gabka iyo liilitirka ee Shaqaalaha Joogtada ah ee Warshadaha Qaranka u bislaatay ilaa 31ka Agoosto 1984, kuna muteystay shuruucdii hore loogu dhaqi jiray waxaa bixineysa Wasaaradda Maaliyadda.—

3. Xaqa liilitirka waxaa yeelanaya oo kale qofka Shaqeeyay muddo ka yar 10 sano ee liilitirka caadiga ah lagu yeesho.

4. Taariikhda Faqradda sare ku tilmaaman ka dib xuquuqda Shaqaalaha u go'day waxay ku yeelanayaan Warshadaha ay ka shaqeeyaan.

Qod. 5aad

1. Saddex sano gudahooda, laga bilaabo taariikhda dhaqan galka sharcigan, Wasaaradda Maaliyaddu waa in ay bixiso xuquuqda liilitirka ee ugu go'day shaqaalaha Warshadaha sharcigii hore loogu dhaqi jiray.

2. Wasiirka Wasaaradda Warshaduhu wuxuu gudbinayaa inta ka horaysa 31ka Disembar 1984, liisaska iyo qoraallada la xiriira shaqaalaha xaqa liilitirka muteystay.—

3. Wasaaradda Maaliyaddu waxay bixinta xaqa liilitirka u sameynaysaa qorshe waqtiyeysan oo 3 sano ah, waxayna u kala hormarineysaa sida shaqaaluhu ay shaqada uga kala horreeyeen.

Qod· 6aad

1. Marka ay jirto baahi weyn, maamulka Warshad du wuxuu heshiis gaar ahaaneed la geli karaa qofkii aqoontiisa ama xirfaddiisa loo arko in Warshaddu ayan ka maarmin.—

2· Heshiiska kor ku tilmaaman, Maamulka Warshaddu wuxuu geli karaa marka uu helo oggolaansha-ha Wasiirka Warshadaha oo qoraal ah.—

Qod· 7aad

Wasiirka Wasaaradda Warshaduhu, isagoo tixgeli-naya soo jeedinta Maareeyaha Guud ee Warshadda iyo heshiiska wadajireed, wuxuu soo saarayaa Xeer nidaa-miye u gaar ah Warshad kasta·

Qod. 8aad

Waxaa la buriyay sharci kasta ee ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan·—

Qod· 9aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S· waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda·

Muqdisho, 5 Lug· 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S·

Maxamed Siyaad Barre

Sharci Lambar 27 taariikh 7 Luulyo 1984 oggolaansho heshiis amaaheed oo dhex maray J.D.S. iyo Bankiga Maal gelinta ee Yurub, kuna saabsan Mashruuca Gaaska Afgooye.—

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.—

Wuxuu Soo Saarayaa: Sharciga Soo Socda.

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meel marinta heshiiska dhex maray J.D.S. iyo Bankiga Maal gelinta ee Yurub, kuna saabsan amaah lacageed oo dhan (7.0 Milyan oo ah ECU) oo loogu tala galay Mashruuca G. Afgooye.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada LUXEMBOUG taariikhdu markay ahayd 16.6.1984.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay sharcigan isagoo lifaaq u ah.—

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobada heshiiska ku tilmaaman qodobka 1aad ee sharcigan, wuxuu leeyahay qiimo iyo astaan sharci la heer ah sharciyada iyo xeerarka Dalka, wuxuuna dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka J.D.S. iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha J.D.S. Waxaa awood loo siiyey inuu Meel mariyo heshiiska sharcigan ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 7 Lug. 1984.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

Sharci Lambar 28 taariikh 7 Lug. 1984 oggolaansho heshiis amaaheed oo dhex maray J.D.S. iyo hay'adda Horumarinta Caalamiga (IDA) oo ku saabsan Mashruuca Gaaska Afgooye.—

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.—
Wuxuu Soo Saarayaa: Sharciga Soo Socda.—

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Meel marinta heshiiska dhexmaray J.D.S. iyo hay'adda Caalamiga kuna saabsan amaah lacageed oo dhan (18) Milyan oo Doolar ah oo loogu tala galay Mashruuca Gaaska Afgooye.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Washinton, taariikhdu markay ahayd 27.6.1984.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay sharcigan isagoo lifaaq u ah.—

Qod. 2aad

Shurudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobada heshiiska ku tilmaaman qodobka 1aad ee sharcigan, wuxuu leeyahay qiimo iyo astaan sharci la heer ah sharciyada iyo xeerarka Dalka, waxaana dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka J.D.S. iyo Heshiiska,

Qod. 3aad

Madaxweynaha J.D.S. Waxaa awood loo siiyey inuu meel mariyo heshiiska sharcigan ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 7 Lug. 1984.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 26 ee 15 Maajo 1984 MEEL MARIN HESHIIS:

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 87aad xubintiisa 7aad, Qod. 82aad xubintiisa 4aad ee Dastuurka J.D.S.
MARKUU ARKAY: Heshiiska Abuurida Sanduuqa la wadaago ee Badeecadaha.

MARKUU TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Golaha Wasiiradda, taariikhdiisuna ahayd 1dii Maarso, 1984.
Wuxuu Soo Saaray: Xeerka Soo Socda.

Qod. 1aad

Dawladda J.D.S. Waxay meel marisay heshiiska Abuuridda Sanduuq la wadaago ee Badeecadaha.

Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu ku yeelan doonaa Dalka J.D.S. Astaan sharciyeed, wuxuuna dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D. Soomaaliya.

Xeerkan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 15 Maj. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

DECREE NO. 26 On 15 May 1984 INSTRUMENT OF RATIFICATION:

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: Article 87 para 7 and Article 82 para 4 of the Constitution of the Somali Democratic Republic—

HAVING SEEN: The Agreement Establishing the Com mon Fund for Commodities.

TAKING NOTE: The approval of the Council of Mini sters of the Said Agreement dated 1st Marsh, 1984

HAREBY PROMULGATES:

THE FOLLOWING DECREE:—

ARTICLE 1

The Covernment of the Somali Democratic Repub- lic hereby Ratifies the Agreement Establishing the com mon Fund for Commodities.

ARTICLE 2

This Agrcement shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic and shall enter forco upon signature by the President of the Somali Democratic Republic.

This Decree shall be published in the Official Bul- letin of the State.

Muqdisho, 15 Maj. 1984

MAJOR GENERAL, MAHAMED SIAD BARRE

PRESIDENT OF THE

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

Xeer Madaxweynaha JDS, Lambar 27 taariikh 7 Luulyo 1984 Meel marin heshiis dhex maray J.D.S. iyo Bankiga Maal gelinta ee Yurub, kuna saabsan amaah Lacageed oo loogu tala galay Mashruuca G/ka Afgooye

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad faqradda 5aad iyo qod. 82aad, faqradda 4aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 27 taariikh 7.7.84 ee Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday heshiiska Xeerkan ku til/man.

MARKUU TIXGELIYAY: In ay lagama maarmaan tahay in heshiiskaas la meel mariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA Xeerka Soo Socda.—

Qod. 1aad

Waxaa la meel mariyey heshiiska dhex maray JDS, iyo Bankiga Maal gelinta ee Yurub, oo lagu kala saxiixday magaalada LUXEMBOUG taariikhdu markay ahayd 16.6.1984, kuna saabsan amaah lacageed oo loogu tala galay Mashruuca Gaaska Afgooye

Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu Dalka J.D.S ku yeelanayaa astaan sharci ah, wuxuuna dhaqan gelayaa marka la is dhaafsado warqadaha meel marinta.

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda ayaana lagu soo saarayaa.

Muqdisho, 7 Lug. 1984.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

DECREE N. 27 on 7 Jul. 84, Instrument of ratification

THE PRESIDENT OF THE SDR

HAVING SEEN: Article 67, Paragraoh 5 and Article 28, Paragraph 4 of the Constituon of the Somali Democratic Republic

HAVING SEEN: The Law no 27 of 7-7-84 on the base of which the People's Assembly has approved the Finance Contract between the Somali Democratic Republic and European Investiment Bank.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify th s Agreement

HEREBY PROMULGATES

The Following Decree:

ARTICLE 1

The Finance Contract between the Somali Democratic Republic and European Investment Bank, Concluded on 16th Jun 1984 in Luxembourg and Concerning the Afgoy Gas Delineation Project; is hereby ratified.

ARTICLE 2

This Agreement shall have a force of law in the Territory of the Somali Democratic Republic and will implemented on the exchange of ratification instruments.

ARTICLE 3

This Decree shall enter into force upon signature by the President of SDR and shall be published in the Official Bulletin.—

Mogadishu, 7 Lug 1984.—

THE PRESIDENT OF THE SDR
Mohamed Siad Barre

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 28 taariikh 7 Luulyo 1984 meel marin heshiis amaaheed oo dhex maray J.D.S. iyo Hay'adda Caalamiga (IDA) oo ku saabsan Mashruuca Gaaska Afgooye.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad faqrada 5aad iyo qod 82aad faqradda 4aad ee Dastuurka.

MAKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 28 taariikh 7.7.84 oo Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday heshiiska Xeerkan ku til/man.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in heshiiskaas la meel mariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA Xeerka Soo Socda.—

Qod. 1aad

Waxaa la oggolaaday meel marinta heshiiska amaaheed ee dhex maray J.D.S. iyo Hay'adda Horumarinta Caalamiga IDA, oo lagu kala saxiixday magaalada Washinton taariikhdu markay ahayd 27.6.84, kuna saabsan amaah lacageed oo loogu tala galay Mashruuca Gaaska Afgooye.—

Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu Dalka J.D.S. ku yeelanayaa astaan sharci ah, wuxuuna dhaqan gelayaa marka la is dhaaafsado warqadaha meel marinta.

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 7 Lug. 1984.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

DECREE N. 28 on 7 Jul. 84 Instrument of Ratification

THE PRESIDENT OF THE SDR

HAVING SEEN: Article 67, Paragraph 5 and Article 82, Paragraph 4, of the Constitution of the Somali Democratic Republic —

HAVING SEEN: The la wno 28 of 7.7.84 on the base of which the people's Assembly has approved the Development Credit Agreement between Somali Democratic Republic and International Defelopment Association.—

HAVIN CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement —

HEREBY PROMULGATES

The Following Decree:

ARTICLE 1

The Development Credit Agreement between Somali Democratic Republic and International Development Association, concluded on 27th Jun 1984 in Washington and concerning the Afgoy Gas Delineation Project, is hereby ratified.—

ARTICLE 2

This Agreement shall have a force of law in the Territory of the Somali Democratic Republic and will be implemented on the exchange of ratification instruments.—

ARTICLE 3

This Decree shall enter into force upon signature by the President of the SDR and shall be Published in the Official Bulletin.

Mogadishu, 7 Lug 1984.—

THE PRESIDENT OF THE SDR

Mohamed Siad B[illegible]

## XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 29 ee 17 Junyo 1984
## Magacaabid Ku Sime Xeer Ilaaliye Guud.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka J.D S.
MARKUU ARKAY: Sharci Lam. 3, soona baxay 10kii Jannaayo 1970, kuna saabsanaa dhismaha Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo wixii beddelaad ku dhacay —

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka.

WUXUU GO'AAMIYEY

Qod. 1aad

Jaalle G/Dhexe Shariif Shiikhuna Maye, oo ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, waxaa loo magacaabay ku simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee MBD.

Qod. 2aad

Ku Simaha wuxuu yeelanayaa Gunno dhan Sh.So 1.109 (Kun iyo Boqol), Bishiiba, waxaana laga bixinaya Miisaaniyadda Agaasinka Guud ee Lacagta WJDS.

Qod 3aad

Dekereetada waxay dhaqan gelaysaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda

Muqdisho, 17 Glu. 1984.—

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY
DIIWAANKA LAM. 5 BOG. 148

Muqdisho, 2 Lug. 1984.

HANTI DHOWRAHA GUUD
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

MADAXWEYNAHA J.D S.

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 30 ee 18 Juunyo 1984

Magacaabid Garsoore (La-Taliye MBD).

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY: Sharci Lam. 3, soona baxay 10kii Jannaayo 1970, kuna saabsan dhismaha Maxkamad daBadbaadada Dalka, iyo bedelaadii ku dhacday.

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka.

WUXUU GO'AAMIYEY

Qod. 1aad

Dhamme Cabdi Cilmi Xasan ee ka tirsan Ciidanka Nabadsugidda Soomaaliyeed, waxaa loo magacaabay inuu Garsoore La-taliye ah ka noqdo Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Xamar.

Qod. 2aad

Garsooruhu wuxuu yeelanayaa gunno dhan Sh.So. 800 Boqol Bishiiba, waxaana laga bixinayaa Miisaaniyadda Agaasinka Guud ee Lacagta MJDS.

Qod 3aad

Dekereetadan waxay dhaqan gelaysaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY
DIIWAANKA LAM. 5 BOG 140
Muqdisho, 2 Lug. 1984.
HANTI DHOWRAHA GUUD

Dr. Xuseen Cabdulle Cali

Muqdisho, 18 Glu 1984.—

MADAXWEYNAHA J.D.S
S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

XEFP WASAARADDA GAASHAANDHIGGA L. 3 ee 4

Juunyo 19844 Magacaabid Kaaliye.—

WASIIRKA WASAARADDA GAASHAANDHIGGA

MARKUU ARKAY: Inay lagama maarmaan tahay in Maxkamadaha Ciidammada Qalabka Sida loo magacaabo Kaaliye Sharciyeysan.

MARKUU TIXGELIYEY: Soo Jeedinta Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee C.Q.S.—

MARKUU ARKAY: Qod. 1aad xub. 5aad Nidaamka Garsoorka Ciidammada.

WUXUU GO'AAMIYEY

Qod. 1aad

L/A/le X. 4605 Maxamed Maxamuud Axmed waxa loo magacaabay Kaaliyaha Maxkamadda Ciidammada Qalabka Sida ee Qaybta 60aad.

Qod. 2aad

Go'aankani wuxuu dhaqan gelayaa markii uu saxiixo Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga, waxana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 4.6.84.—

WASIIRKA WASAARADDA GAASHAANDHIGGA JDS.

SARREEYE GUUD

Maxamed Cali Samantar

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO,

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Cusmaan Sheekh Maxamed uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 5-1-83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wardhiigley Qaabkiisuna yahay Afar Gees Islaeg Addimihiisuna yihiin 20X20 kuna fadhiya 400 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay
Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buga Faafinta sharciga Rasmiga ah

Muqdisho, 5 Feb. 1983.—

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D. H. EE XAMAR.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan.

L. 243

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO,

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Saciid Maxamed Maxamuud uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 25-12.82 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 20X60 kuna fadhiya 1-200 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul lam. 150-130-110-90

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buga Faafinta sharciga Rasmiga ah

Muqdisho, 5 Feb. 1983.—

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D. H. EE XAMAR.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan.

L. 244

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO,

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in JAle Cusmaan Maxamed Heerow iyo Madiina Calasow Maxamed uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 26.1-83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wardhiigley Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 27X13,50 kuna fadhiya 364,50 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Max/ed X. Iikar iyo C.C

Galbeed Waxaa ka xiga: W. Shariif Calawi.

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buga Faafinta sharciga Rasmiga ah

Muqdisho, 5 Feb. 1983.—

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D. H. EE XAMAR.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan.

L. 245

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO.

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Maxamed Sheekh Xasan Nuur uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 23-1-83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Hodon Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 27X13,50 kuna fadhiya 364,50 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta agu soo qoro Buga Faafinta sharciga Rasmiga ah

Muqdisho, 5 Feb. 1983.—

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D. H. EE XAMAR.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan.

L. 246

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO,

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Saciid Maxamed Maxamuud uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 12-1-83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan Qaabkiisuna yahay Retta ngolare Addimihiisuna yihiin 60X40 kuna fadhiya 2400 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: DhulLam. 4204-B 4205 B

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buga Faafinta sharciga Rasmiga ah

Muqdisho, 5 Feb. 1983.—

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D. H. EE XAMAR.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan.

L. 247

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO,

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Maxamuud Axmed Shirwac uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 15.1.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Yaaq Shiid Qaabkiisuna yahay Ret tangolare Addimihiisuna yihiin 20X10 kuna fadhiya 200

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buga Faafinta sharciga Rasmiga ah

Muqdisho, 5 Feb. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D. H. EE XAMAR.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan.

L. 248

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

BEDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Faaduma Cabdulaahi Cali maalintii taariikhdu ahayd 10-11.76 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho, Deg. Hodon Qaabkiisuna ahaa Rettangolare Addimihiisuna ahaayeen 30X20 kuna fadhiyey 600 Mdh.— Looga qaaday dan Guud awgeed looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan sida ku cad warqadda ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan sidaa awgeed naadadii hore loogu soo diray lambarkeeduna ahaa WHG.3-23,146 ee 13-2.77 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta Guud awgeed wuxuu ku yaal Deg. Kaaraan Qaabkiisu Waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 227 B.

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 223 B.

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 226 B.

Marka, 2.6.84,—

Gudd. Maxkamadda Gobolka Sh. Hoose Marka
Maxamed Keynaan Warsame

L. 250

MAXKAMADDA GOBLKA SH. HOOSE MARKA

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUUU ARKAY: Buugga Keyd Lam. 1236/7 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Q/Yooley, kuna qorneyd Lacag dhan Sh.So. 15,900 ayna lahayd Faaduma Jumcaale Cumar Xasan, sida ku cad warqadda taar. Tahay 24,6,84 kana soo baxday Bankiga Ganacsiga & Keydka Soomaaliyeed laanta Q/Yooley. —

HADDUU ARKAY: Qod. shaciga lam. 2 ee 9,9,65;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 1236/7 kuna qoran Faaduma Jumcaale Cumar Xasan ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 15,900.—

WUXUU AMRAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Q/Yooley u bedesho Faaduma Jumcaale Cumar Xasan, Buugga Keydka kor ku tilmaaman una sameeyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato mud do aan ka yareyn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S, Haddii inta ka horaysa aan laga keenin wax is hortaag ah.

Marka 27.6.84.—

Gudd. Maxkamadda G. Sh. Hoose

Maxamed Keynaan Warsame

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN.

HADDUU ARKAY: In J. War. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 236688 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh So. 30,000 uu iska lahaa Maxamed Abuukar Sh. Xuseen sida ku cad warqadda lambarkeedu 0001730 taariikhdu 21.7.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharci lam. 2 ee 1,9,65,

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega War. Lam. 236688 oo ku qoran Maxamed Abuukar Sh. Xuseen ayna ku jirto Sh.So. 30,000

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta u bedelo Jeega War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.—

Muqdisho, 22.7.84,—

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 251

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In J. War. Dhumay oo lambarkiisu

ahaa 528737 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad kuna qoran lacag dhan Sh So. 50,000 uu iska lahaa Cabdu laahi Cumar Jaamac sida ku cad warqadda lambarkeedu 00560 taariikhdeedu 29.7.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexad

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega War. Lam. 528737 oo ku qoran Cabdulaahi Cumar Jaamac ayna ku jirto Sh.So. 50,000

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad u bedelo Jeega War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S, Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.—

Muqdisho, 30.7.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 252

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: In Jeeg X/S Dhumay oo lambarkii su ahaa 362017 lagana soo saaray Warshadda Snai Biasa kuna qoran lacag dhan Sh.So. 6·095 uu iska lahaa J/le Yuusuf Weheliye Bulaale sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay WSB 1·30-300/84 Taariikh 5·5.84.—

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega X/S Lam. 362017 oo ku qoran magaca Yuusuf Weheliye Bulaale ayna ku jirto Sh.So. 6·095.

WUXUU FARAYAA

In Warshadda SNAI BIASA Jeega X/S u bedelo J/le Yuusuf Weheliye Bulaale J/X ee kor ku til'maaman una samceyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J·D·S. Haddii inta ka horaysa aan wa is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.7·84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

Dr. Cabdulaahi Maxamed Maaj.

—

MAXKAMADDA DEG· GOBOLKA BERBERA.

Ku· Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Muqdisho·
Og. Bankiga Ganacsiga iyo K· Soomaaliyeed L· Berbera
Garsooraha Maxkamadda Degmada Berbera·
MARKUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN·

WUJUU OGAADAY: Waxa ay ku saabsantaha arkay na ogeysiiska Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soo maaliyeed laanta Berbera taariikhdiisu tahay 24·3.84 wuxuuna ogaaday in ay tahay Shaqadiisa·
HADDUU ARKAY: Qod. 69 D·L· 9,9,65 n, 2

WuxuuCadaynayaa Lumidda Jeega War· Lam· ya hay 583693 ee 10.3·84 kuna qoran tahay lacag dhan ShSo 32·800 Soomaali ah iskana lahaa Shariif Batuun Max'd·
Wuxuu Amrayaa in loo sameeyo Jeeg War. ee cus ub Ninka kor ku magacaaban 15 maalmood ka dib mar kii amarkan lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee da wladda·—

Waxaa la Codsanayaa In Jeega Cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Shariif Batuun Maxamed ama qof isaga ka sita wakaalad sharci ah iyadoo la su gaayo 15 maalmood ee kor ku qoran·

Berbera. 28·7·84

Carab Maxamed Cadow
Kaaliyaha Maxkadda Deg· Gobol
Garsooraha Maxkamadda Deg Gobolka Berbera·

Maxamed Axmed Wardheere

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDD. MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Jeeg War. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 477552 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh.So. 20.000 uu iska lahaa Khadiija Cismaan Canshuur sida ku cad warqadda lambarkeedu 0001750 taariikhdeedu 23.7.84 ee Bankiga Gancsiga iyo Keydka Soomaaliyeed L. Xarunta

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lamb. 2 ee 9.9.65,

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga War. Lam 477552 oo ku qoran Khadiija Cismaan Canshuur ayna ku jirto Sh.So. 20.000

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Xarunta u bedelo Jeega War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 29.7.84

GUDD. MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA BOB. W/GALBEED HARGEYSA

MGH/LAMBAR 1-84 Taariikh 3.4,84

Cusbooneysiin Jeeg lumay Lambar 376579 ee taariikh-diisu tahay 3.3-84 lacagtiisuna dhan tahay 20,000 laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Hargeysa, kuna qoran Xuseen Maxamed Maxamuud.
Gudd. Maxkamadda Gobolka W/Galbeed ee Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga Dalabka ku taariikhaysan 24kii Maarso 1984 ee uu soo qortay Xuseen Maxamed Maxamuud, kuna aabsan in loo cusboonaysii yo Jeega War- ee lambarkiisu ujeedada ku qoran tahay, lacgtiisuna anayd 20,000 oo kaliya.

MARKUU ARKAY: Cadaynta Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Hargeysa, lambarkeeduyahay 448 ee taariikhdeedu tahay 26-3,84, ee lagu Cadeeyey in taariikhdu markay ahayd 3-3,84, Xuseen Maxamed Maxamuud loo sameeyey Jeega War- ee sare ku qoran,

MARKUU Eegay Qodobada 69-70 ee Xeer lambar 2 soo na baxay 9,9,65

WUXUU: Go'aamiyey in la kansal gareeyo Jeega War- ee lambarkiisu yahay 376579 lacagtiisuna tahay 20,000 Gacantana laga saaro Xuseen Maxamed Maxamuud ama ciddii kale oo uu siiyo Wakaalad Rasmi ah 15 maalmood ka dib maalinta Go'aanka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee J,D,S,

WAXAA LA FARAYAA MAAMULKA

Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Hargeysa inuu ku dhejiyo Iridka Bankiga Nuqulada Go'aankan si ciddii dan ka lehi ay halkaas uga Eegato muddo 15 maalmood ah.—

Hargeysa, 2-4.84
Maxamuud Jaamac Cigaal
Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka Hargeysa
Gudd. Maxkamadda Gobolka W/Galbeed ee Hargeysa
Ibraahim Faarax Maxamed